Xulashada iyo Koorsooyinka Dugsiyada Sare

Ilmihiina oo dugsiga sare ku biiraya waa xilliga ugu muhiimsan ee waxbarashada ilmihiina Koorsooyinka ardeydadu ku xushaan fasalka 9aad, waa mid saameyn ku yeelandoona waxbarashadoda fasalada dambe iyo dugsiga sare kadibba.

Sidee bay waalidiintu u kaalmeyn karaan?

Inta u dhexeysa bilaha Octoober iyo Janayo, ardeygiina fasalka 8aad ku jira waxay helidoonaan, xogwaran ku saabsan barnaamijyada iyo koorsooyinka dugsiga sare. Dugsiyada qaar ka mid ah waxay qabtaan habeenka xogwaranka ama kulan warbixin ah. Waxaa loo baahanyahay, in aad akhridaan warqadda xogwaranka kana qeyb gashaan habeenka xogwaranka, si aad ilmihiina ugu kaalmeysaan si ay u xushaan koorsooyinkay danaynayaan, awoodooda iyo hadafkooda mustaqbalka. Bulshooyinka qaarkoodana, ardeyda fasallada 8aad, waxay kala dooranayaan dugsiyada sare kuwa bixinaya koorsooyin iyo barnaamijyo kala duwan.

Wiilkiinu ama gabadhiinu waxay idiin keeni doonaan foom (form) aad saxiixdaan. Foomkana waxaa ku taxan koorsooyinka la kala dooranayo. Waxaana aad loogu baahanyahay inaad koorsooyinka in aad dulmartaan idinka iyo ilmihiinnu, si aad u hubisaan ubadkiinu koorsooyinkay qaadanayaan inay yihiin kuwa dantooda iyo awoodadaba ku habboon. Ogolaanshaha xulashada koorsooyinka ama maadooyinka idinka ayaa masuul ka ah.

Haddii aad kaalmo u baahantihiin, waxaad la hadashaan lataliyaha guud ee dugsigiina. Dugsiyada iyo Guddoonka dugsiyadu, waxay qoraal ku soo bandhigaan xogwaranka ku saabsan xulashada dugsiyada iyo taxane koorsooyinka ah. Shaqaalaha dejinta dugsiyadu waxay awoodi karaan inay gacan u fidiyaan dadka dalka Kanada ku cusub.

Waxa aad loogu nbaahanayahay in aad xasuusataan koorsooyinka ardeyda fasalka 9aad ay xulanayaan, in mustaqbalkooda xulashadan ay wax u dhimi karayso. Waxaana jira koorsooyin badan oo kala duwan. Qaarkoodu waxay ardeyda u hagayaan, Kulliyadaha Bulshada, kuwa kalena Jaamacadaha iyo qaar kale oo xirfadaha gaarsiinaya ama si toos ah shaqada ay ku tagi karaan. Dugsiyada sare oo dhan koorsooyin isku wada mid ah ma bixiyaan.

Badanaaba, ardeyda ku guuleysata fasallada 9aad, waxaa la filayaa inay dugsiga sare ay ka qalin jabiyaan. Waalidiintu waa inay ilmahooda sannad walba ku caawiyaan xulashada koorsooyinka ku habboon.

Sideebay waalidiintu ilmahooda ugu kaalmeyn karaan xulashada wanaagsan?

Caruurtiina kala hadla waxay damacsan yihiin inay qabtaan markay dugsiga sare dhammeeyaan ka dib. Dugsiyada xaafadihiina waxaad ka soo qaadataan, taxanaha koorsooyinka ama waxaad akhrisataan qorallada dugsiga ka hadla (school profile) oo laga helo cinwaanka Internet-ka dugsiga. Dugsiyada oo dhan koorsooyin isku heerar ama isku wada mid ah ma bixiyaan.
Ka qeyb gala, bandhigyada habeenka xogwarranka dugsiyada bandhigga xogwaranka qaata. Dugsiyada qaarkooduna waxay idiin heli karaan turjubaanno. Waxaad ballamo ka sameysataan, hoggaanka lataliyaha dugsiga, maamule ku xigeenka ama maamulaha dugsiga, si ay idiin ku caawiyaan ilmiihiina waxa aad ugu habboon ee danahooda iyo kartidooda.

Waa maxay shuruudaha la iska rabo si looga qalin-jabiyo dugsiyada sare ee Onteeriyo?.

Ardeydu waa inay ku guuleystaan 30 koorso inta u dhaxeysa fasallada 9aad iyo 12aad kuna dhameeyan dugsiga sare muddo afar ama shan sano, haseyeeshe, way sii joogi karan intay ka gaarayaan 21 jir.

Ardeydu waa inay ku guuleystaan 18 koorso oo la iska rabo iyo 12 koorso oo xulasho ah.
Ardeydu waa inay gudtaan 40 saacadood oo ka hawl galka wax qabadka bulshada
Ardeydu waa inay ku guuleystaan imtixaanka wax akhriska iyo qoraalka ee dugsiyada sare ee Onteeriyo ama imtixaanka koorsada wax akhriska iyo qoraalka.

Ardeydu maxay dooran karaan intay ku jiraan fasallada 9aad iyo 10aad ?

Fasallada 9aad iyo 10aad waxaa jira afar nooc oo koorsooyin ah:

- **Koorsooyinka Farsamada –** Maadada gacan ku hawl-galka oo culeys la saaro iyo tusaalooyin la taban karayo.
- **Koorsooyinka aasaasiga-** oo culeys lagu saarayo afkaarta guud iyo mashaakilada waxbarashada guud.
- Koorsooyinka la iska rabo (Credit) ee **Deegankan la lagu Habeeyay ama lagu Kobciyay**, (sidoo kalena loo yaqaano, kuwa Muhiimka ah) looguna talagalay ardeyda badalaada badan iyo kuwa gargaarka u baahan.
- **Furitaan ama Bilow** – Ardeyda loo diyaarinaya waxbarasho dheeraad ah iyo kuwa aqoontooda la kobcinayo. .

Ardeydu waa inay qaataan Ingiriiska, Xisaabta, Sayiniska, Jografiga, Taariikhda, Jimicsiga Jirka iyo Faransiiska. Tusaale ahaan: Ardeygu wuxuu qaadan karaa koorsada farsamada Ingiriiska iyo Xisaabta maadiga. Waxayna ka dooran karaan koorsooyinka la kala xusho ama bilowga ee maadooyinka ay daneynayaan.

Sideebaa xulashada koorsooyinka fasallada 9aad iyo 10aad ardeyda wax uyeeleyn karaan?

Koorsooyinka ardeydu ay ku xushaan fasallada 9aad iyo 10aad, waxay u sii diyaarinayaan koorsooyinka fasallada 11aad iyo 12aad isla markaasna waxyeelo ku keeni karaa xulashadooda dambe ee markay qalin jabiyaan.

Ardeydu afar ilood ayay koorsooyinka u kala dooran karaan, kaaso ah dantay ku gaari lahaaayeen dugsiga sare ka dib: sida goobaha shaqada, Jaamacadaha / kulliyadaha (University/colllege) iyo kulliyadaha.

Xageebay koorsooyinku wax u hagayaan?



Ardeydu koorsooyinkooda hal nooc illaa iyo nooc kale miyay ku kala badalan karaan?

Siyaabaha qaarkooda, ardeydu hal nooc oo korso ah waxay ku badalan karaan koorso kale; Si ay sidaas u yeelaanna waa in hal maado dib ugu noqdaam (Tsle: Ardey fasalka 9aad ku dhameeyay xisaabta farsamada, waxa laga yaabaa inuu qaato xisaabta maadiga). Ama waxaa laga yabaa inuu yeelo koorso lagu badalanayo oo uu ku qaadanayo Internet-ka ama xilliga dugsiga kuleylaha.

Waalidiinta maxaa ku haboon oo ay weydiinayaan marka la xulanayo dugsiga sare?

- uruusta maadiga ee aad ku bixisaan fasallada 9aad iyo 10aad maxay yihiin?
- Duruustee ayaad ku bixisaan fasallada 11aad iyo 12aad ee koorsooyinka goobta shaqada Kulliyadda, Kulliyad/Jaamacad iyo Jaamacad.
- Maxaay yihii koorsooyinka lakala
- xusho ama barnaamijyada aad bixisaan? (Tsle: xirfadda kombuterka, luqadaha)
- Ma jiraan koorsooyin la joojinayo (Cancel), iyadoo sabab looga dhigayo ardeyda is diiwaan galisay oo tiradoodu yaraatay awgeed? Waana kuwee?

Maxay waalidiintu ka weydiin karaan waxa ku saabsan kaalmada waxbarashada gaarka ah?

- Noocyada baahidaa gaarka ah ee dugsigiinu ku taagyeero waa kuwee?
- Wax tarka (resource) dugsigiina laga helo waa maxay? (Tsle. Sida, Shaqaalaha dugsiga, meelaha kombuterka lagu barto Computer Lab),
- Ardeyda baahida gaarka ah qabta noocyada koorsooyinka aad u haysaan maxay kala yihiin? Ma Koorsooyin gaar ah baa mase waa kuwo lagu lamaanay ama la xiriira korsooyinka jira.

Maxay waalidiintu ka weydiin karaan su'aalaha ku saabsan barnaamijka ESL?

- ESL oo hanasho ah ama Credit ma haysaan? Maadadeed ku haysaan? Fasalkeed ku haysaan**.**
- Koorsooyin ESL ah oo maadooyin kale ma haysaan?

Haddii aad u baahantihiin xogwarran dheeraad ah:

- Guddoonka Waxbarashada dugsigiina ama dugsiga ilmihiina booqda.
- Wasaaradda Waxbarashada; http://www.edu.gov.on.ca/eng/document/curricul/secondary/oss/oss.pdf
- Qoraalka dadka dalka ku cusub ee dugsiyada sare: http://www.settlement.org/edguide

Ururka The Ontario Parent Inclusion Initiative: Xubn aha ururka waxaa ka mid ah: Dilico Ojibway Child & Family Services, Thunder Bay; F.A.I.R., Family Service Association, Toronto; Keewatin- Patricia DSB; Maytree Foundation; PERCS- Waterloo Region; People for Education; Settlement Workers in Schools; iyo kuwa matilaya waalidiinta wakiilada Ottawa iyo Degmada York. Koobiyada waxaad ka helaysaan dhow luqadood, oo aad ka helidoontaa: www.peopleforeducation.com. © People for Education 2006/